HAY'ADA GANACSIGA IYO HORMARINTA BULSHADA
Deeqda Lacagta Kasoo Kabashada Dhaqaale Bridge

Tilmaamaha Dalbadayaasha

Ujeedada waraaqahani waxaa weeye inay siiso tilmaamo Waaxda Fulinta, Xeer Dejinta, Hay'ada iyo Waaxda La Shaqaysa, iyo Dalbadayaasha Deeqda Dhaqaale ee Deeqda Dhaqaale ee Bridge ee Kasoo Kabashada Dhaqaale ee lagu sameeyay Sharciga 9, iyo sida uu dhigayo Sharciga Qorshaha Kasoo Kabashada Maraykanku.

Abriil 17, 2021, H.315 waxaa loo dhaqan geliyay Sharci 9 (Sharciga). Sharcigu waxa uu diyaariyay $10 milyan oo deeq lacageed ah oo laga heley Sharciga Qorshaha Kasoo Kabashada Maraykanka (ARPA) oo lasiinayo Hay'ada Ganacsiga iyo Hormarka Bulshada (ACCD) si ay u siiso deeqda lacagta ganacsiyada iyo hay'adaha samofalka ah ee Vermont ee u qalma kuwaas oo waayay cashuurta 2020 oo una baahan kaalmo Gobolka oo dhakhso ah. Sharciga waxaa loogu talo geley barnaamijka Bridge ee Kasoo Kabashada Dhaqaalaha inuu siiyo mudnaanta deeqda ganacsiyada aan hore u qaadan kaalmo dhaqaale oo Gobolka ama Federalka ah. Ilaa inta la heli karo deeqda, barnaamijku waxa sidoo kale loogu talo geley inuu siiyo deeq ganacsiyada waayay cashuurta xataa markii ay heleen kadib kaalmada Gobolka ama federalka.

NIDAAMKA ARJIGA

Dalbadayaashu waxay gelin doonaan macluumaadka looga baahan yahay daaqada arjiga ee onleynka ah ee Hay'ada Ganacsiga iyo Hormarinta Bulshada oo waxay gudbin doonaan arjigooda, oo uu la socdo dhamaan waraaqaha loo baahan yahay. Dadka naqdiyada oo ka socda Hay'ada Ganacsiga iyo Hormarka Bulshada, iyo cid kale oo ay leeyihiin iskaashi, ayaa naqdin doona dhamaan arjiyada taas oo ku salaysan shuruudaha mudnaanta ee lagu sheegey macluumaadka lagu eegey hoos ee la ansixiyay, diiday ama lasoo celiyay ee arjiga wixii macluumaadka ah iyo/ama sixitaan ah.

SHURUUDAHA U QALANKA

Ganacsiyada u qalma waa inay buuxiyaan dhamaan shuruudaha hoose si ay u heli karaan Deeqda Dhaqaale ee Bridge ee Kasoo Kabashada Dhaqaale. Ganacsiga:

1. Waa inuu degan yahay, ama meesha kowaad ee uu ka shaqeeyaa waa inay tahay Vermont; IYO
2. Uu habaysan yahay oo uu shaqaynayo:
    a. Ganacsiyada faa'ido doonka ah, oo ay ku jiraan kuwa qofka kaliya leeyahay, shuraakada, LLC, shirkada dadka badan isku tageen, ganacsiyada la wada leeyahay, ama shirkada faa'ido dad badan ka dhaxeeya ah; AMA
    b. Hay'adaha samo falka ama faa'idada yar laga rabo, sida shirkada faa'idada dadka badan ka dhaxeeya, shirkada loo sameeyay samofal shacab, iyo shirkada faa'idadoodu yar tahay ee khasaarada cida leh aanu soo gaadhin; IYO
3. Furan wakhtiga arjiga; AMA
    a. Loo xidhay wakhtiga arjiga xaalada gurmadka degdega ah ee COVID-19 darteed laakiin la qorshaynayo in dib loo furo; IYO
4. U hogaansan nidaamka amaanka iyo caafimaadka Gobolka ee wakhtigan *Qorshaha Dib u Furitaanka Hore u Socodka Vermont* [1]; IYO
5. Waxa uu muujin karaa in ganacsigu uu khasaaray 2020, kaas oo khasaarahaasi uu ka badan yahay kii uu sheegey 2019, ee uu kusoo gudbiyay cashuur gelinta; IYO

[1] https://www.vermont.gov/vermont-forward#gsc.tab=0

6. Xidhiidh wanaagsan ka dhaxeeya Waaxda Shaqaalaha Vermont (hadii ay ku munaasab tahay, waxaa xaqiijinaya qiimeeyaha); IYO
7. Xidhiidh wanaagsan ka dhaxeeya Xoghayaha Gobolka Vermont (hadii ay ku munaasab tahay, waxaa xaqiijinaya qiimeeyaha); IYO
8. Xidhiidh wanaagsan ka dhaxeeyo Waaxda Vermont ee Cashuuraha; IYO
9. Aan wakhtigan ku jirin kicitaanka dhaqaale ee Cutubka 7;

Ganacsiyada u qalma waxaa looga baahan doonaa inay bixiyaan macluumaadka soo socda ee ku saabsan arjiga deeqdan:

- Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha Federalka (Federal Employer Identification Number, FEIN) ama Lambarka Ambiga Bulshada (kaliya ganacsiga qofka kaliya leeyahay);
- North American Industrial Classification System (NAICS) sharcigeeda dalabka shirkada;
- P&Ls bishii ee mudada Maarso 2020 ilaa Abriil 2021, kaas oo isticmaala xisaabinta dakhliga rasmiga ah;
- Macluumaadka ku saabsan wixii guno ah ama kaalmo ah[2] ganacsiga dalbanaya uu heley ama uu uga dalbaday:
    - Barnaamijka Ilaalinta Mushaharka Federalka (Federal Paycheck Protection Program, PPP) dayntiisa 2020 ama 2021 iyo xadiga la iska dhaafay;
    - Hormarinta Daynta Dhaawaca Masiibada ee Dhaqaale (Economic Injury Disaster Loan, EIDL) (deeqo);
    - wixii kale ee deeqo dhaqaale ee federalka ama gobolka ee waxyeelada dhaqaale ee ka timid COVID-19 2020 iyo 2021;
- Cashuur Celinta Gobolka iyo Federalka ee 2019 iyo 2020;
- Gelinta qaansheegaha hal bil ee kharashaadka joogtada ah ee bilaha ah:
    - Daynta ama kirada guriga shaqada;
    - Caymiska ganacsiga;
    - Laydh;
    - Kulayliye;
    - Biyo;
    - Adeega bulaacada;
    - Adeegyada isgaadhsiinta (adeega taleefanka oo uu ku jiro laynka guriga iyo taleefanka gacanka iyo adeegyada internetka ee shaqada); iyo
    - Adeega internetka.

Ganacsiyada xidhan wakhtiga arjiga waa inay keenaan waxyaabaha soo socda:

- Cadayn *(lagu bixiyay arjiga)* in dalbaduhu u isticmaali doono deeqda lacagta inuu dib u bilaabo shaqada ganacsi iyo kasoo kabashada dhaqaale;
- Ganacsiyada iminka aan shaqaynaynin, sharax kooban, qoraal ah *(lagu bixiyo arjiga)* qorshihiisa kalsooniga in dib loo furayo.

[2] Xadiga kaalmada waxaa loo adeegsan doona si loo xisaabiyo dakhliga rasmiga ah, kaas oo weli ay ka muuqato khasaaraha rasmiga ah si loogu qalmo in la isasiiyo.

SHURUUDAHA MUDNAANTA ARJIGA

Hay'ada Ganacsiga iyo Hormarinta Bulshadu waxay ka faa'idaysan doontaa heerarka hoose marka ay mudnaanta siinayso arjiyada deeqda ee soo gaadhay:

30 maalmood ee ugu horeeya ee deeqda marka la aqbalo deeqdaha mudnaanta kowaad ayaa la siin doonaa dalbadayaasha buuxiyay dhamaan shuruudaha hoose:

- Ganacsigu muu helin, ama ma jiro arji u maqan [3], oo awax kaalmo dhaqaale oo Gobolka ama Federalka ah ee 2020 ama 2021 *(waxa taas kamid ah, laakiin kuma xadidna):*
    - Daynta iyo Deeqda Lacagta Barnaamijka Ilaalinta Mushaharka;
    - Hormarinta Daynta iyo Deeqda Dhaawaca Masiibada ee Dhaqaale;
    - Wixii kale ee kaalme dhaqaale ee toos ah oo loo ay bixiyaan Deeqda Dhaqaale ee Korona Fayras ama Deeqda Dhaqaale ee ARPA oo ay ku jiraan:
        - Deeqda Lacagta Kasoo Kabashada Dhaqaale ee Vermont;
        - Deeqda Barnaamijka Xasilinta Ganacsiga Qolka Kaliya Leeyahay;
        - Deeqda Lacagta Bixiyaha Daryeelka Caafimaadka;
        - Deeqda Dhaqaale ee Dib Usoo Noolaynta Maqaaxiyaha;
        - Deeqda Lacagta Xarumaha Burburay;
        - Deeqda Lacagta Beeraha Vermont;
- Ganacsiga khasaaray 2020, sida ku cad cashuur celinta federalka.

Wixii ka danbeeya arjiga deeqda lacagta la bixiyo ee 30 maalmood ee hore, Hay'ada Ganacsiga iyo Hormarinta Bulshadu waxay sii wadi doontaa inay siiso mudnaanta kowaad ee deeqda lacagta cida mudnaanta leh sida ay dhigayaan shuruudaha sare. Laakiin, wixii ka danbeeya 30 maalmood ee kowaad, Hay'ada Ganacsiga iyo Hormarka Bulshadu waxay isticmaali doontaa shuruudaha mudnaanta labaad oo waxaa la siin doontaa deeqda dhaqaale ganacsiyada khasaaraha galay 2020 markii ay cashuurta soo celinayeen, oo ilaa iminka ku jira khasaare kadib marka ay ku daraan kaalmada dhaqaale ee aan la cashuuraynin ee ay helaan 2020 iyo 2021. Tan waxaa kamid ah:

- Kaalmada dhaqaal ee Gobolka ama Federalka ee aan la cashuuraynin *(oo waxaa kamid ah, ka dhaafitaanka daynta ee Barnaamijka Ilaalinta Mushaharka, Deeqda Lacagta Dhaawaca Dhaqaale ee Masiibada, iyo wixii kaalmo dhaqaale ee toos la isku siiyo ee aan la cashuuraynin ee ay bixiyaan Samofalka Korona Fayras ama Deeqda ARPA);*

[3] Arjiyada ee dalbaday, ee weli arjigoodu maqan yahay, Deeqda Xarunta Burburay iyo Deeqda Dib u Noolaynta Maqaaxiyaha laguma dari doono mudnaanta 30 maalmood ee kowaad.

CAAQIDADA BIXINTA DEEQDA

Xadiga deeqda waxaa loo xisaabin doonaa: Sadex jeer xadiga kharashka joogtada ah ee bishii sida ay muujinayaan qaan sheegaha la geliyay. Ganacsiyada u qalma kharashka bishii ee joogtada ah oo ay kamid yihiin *(sida ay muujinayaan qaansheegaha la geliyay):*

- Daynta ama kirada guriga shaqada;
- Caymiska, laydhka;
- Kulayliyaha, biyaha;
- Adeega bulaacada;
- Adeegyada isgaadhsiinta; iyo
- Adeega internetka.

Laakiin, bixinta deeqdu waa inayna ka badan inta yar:

- Dalbahu waxa uu weli ku jirayaa khasaare kadib marka uu heley kaalmada mudnaanta ah ee aan la cashuuraynin ee dheeraadka ah; AMA
- $150,000[4]:

NIDAAMKA IYO U HOGAANSANKA HANTIDHAWRKA

Dhamaan deeqaha ay bixisay Hay'ada Ganacsiga iyo Hormarka Bulshadu waxa ay mari doonaa hanti dhawrka caadiga ah ee lagu sheegey tilmaamaha waraaqahan ku jira. Waxaa lagu talinayaan in dhamaan waraaqaha iyo risiidhada lagu heley si waafaqsan kharashka deeqda in la hayo, oo la hayo mudo 5 sano ah hadii loogu baahdo hanti dhawr.

Dalbade kastaa waa inuu bayaamiyaa, isaga oo og in ciqaab sharci lagu mudan karo, in dhamaan macluumaadka uu ku bixiyay dhamaan foomamka arjiyada iyo waraaqaha uu geliyay inay run yihiin oo ay sax yihiin. Gobolka Vermont waxay ku tiirsan tahay xaqiijintan macluumaadkan ay matalayaan marka ay bixinayaan deeqda. Sidoo kale, dalbadayaashu wa ainay bayaamiyaan inay fahmeen been ka sheegida u kaska ah ee macluumaadka inay tahay khiyaano oo ay keeneyso in arjiga lagu waayo wixii gunooyin ah ee dheeraad ah, ciqaabka maamulka, iyo ciqaabka danbi.

Sidoo kale, dhamaan deeqaha waxay marin doontaa baadhitaan Hay'ada iyo Hantidhawrka Xisaabaadka Gobolka sida hore loo sheegey mudo 5 sano ah *(ama mudo uu dejisto Hantidhawrka Gobolka).*

NIDAAMYADA LA NOQOSHADA

Hay'ada Ganacsiga iyo Hormarka Bulshadu waxay sharcigu u ogol yahay inay la noqoto deeqda; 1) hadii cida la siinayo la ogaado inayna u qalmin in la siiyo; 2) uu qaatan lacag ka badan intii loogu talo geley

[4] Hay'ada waxay awood u leedahay inay yarayso xadiga wixii deeq ah iyada oo raacaysa tilmaamahan, oo kuna salaysan wixii xadi ah ee la COVID-19 ee la xidhiidha kaalmada dhaqaale ee tooska ah ee ganacsigu ka heley ilo Gobolka ama Federal ah.

ee deeqda; 3) ama la ogaado inuu u isticmaalay lacagta hawlo kale oo aan ahayn taageerada dalbadaha ganacsigiisa.

MUDADA ARJIGA DEEQDA DHAQAALE

Hay'ada Ganacsiga iyo Hormarka Bulshadu waxay marka hore furaysaa mudada mudnaanta kowaad ah ee arjiga 45 maalmood oo ka bilaabma wargelintan. Arjiyada mudnaanta labaad waxaa la eegi doonaa oo la naqdin doonaa wixii ka danbeeya 30 maalmood ee hore ee arjiyada mudnaanta kowaad.